

Tallaalka COVID-19

Waa maxay tallaal?

Tallaal waa nooc daawo ah. Waa irbad ama duritaan.

Muxuu tallaalku sameeyaa?

Qaadashada tallaalka ayaa kaa ilaalinaysa inaad jirrato. Waxaa jira noocyo kala duwan oo tallaalo ah oo loogu talagalay jirrooyin ama cudurro kala duwan.

Tallaalku ma badqab baa?

Haa. Dhakhaatiirta iyo saynisyahanadu waxay si adag ayay u shaqeeyaan si loo hubiyo in tallaaladu ay badqab yihiin. Keliya tallaalada badqabka ah ayaa la ansixiyay si loo loogu isticmaalo gudaha Kanada. Badqabka tallaalada marar badan ayaa dib-u-eegis lagu sameeyaa.

Ma jiraa tallaal loogu talagalay COVID-19?

Haa, waxaa jira dhowr tallaal oo cusub oo loogu talagalay COVID-19.

Tallaalada COVID-19 ma yihiin kuwo badqab ah? Waxaa loo sameeyay si dhakhso ah.

Haa. Dhakhaatiirta iyo saynisyahanadu waxay si adag u shaqeeyaan si loo hubiyo in tallaaladu COVID-19 ay badqab yihiin. Keliya tallaalada badqabka ah ayaa la ansixiyay si loo loogu isticmaalo gudaha Kanada. Badqabka tallaalada marar badan ayaa dib-u-eegis lagu sameeyaa.

Miyaan ka qaadi karaa COVID-19 tallaalka?

Maya. Kama qaadi kartid COVID-19 tallaalka. Tallaalku wuxuu ka caawiyaa jirkaaga inuu aqoonsado lana dagaallamo COVID-19.

Ma jiraan waxdhimaalo laga qaado tallaalka COVID-19?

Kadib marka aad qaadato tallaalka, waxaad yeelan kartaa wadhimaalo. Gacanta ayaa laga yaabaa inay kaa xanuunto halka lagaa duro. Waxaad dareemi kartaa daal ama qandho. Tani macnaheedu waa in jirkaaga ka falcelinayo tallaalka. Waxdhimaaladaan waxay sii socon karaan dhowr maalmood.

Dadka qaar ayaa xasaasiyad ka qaadi kara tallaallada. Waxaa laga yaabaa inay yeeshaan waxdhimaalo aad u daran. Waxdhimaaladan daran waa naadir.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa

manitoba.ca/COVID19/vaccine si aad u hesho macluumaad.

Ka waran haddii astaamahaygu ay sii socdaan wax ka badan dhowr maalmood?

Waxaa laga yaabaa inuu kugu dhacay fayras intaadan qaadan tallaalka. Haddii astaamahaagu ay sii socdaan wax ka badan hal ama laba maalmood, waxaa laga yaabaa inaad jirran rabto. Waa inaad is-go'doomisaa (ka fogow dadka kale) oo iska baartaa COVID-19.

Yaa marka hore qaadan doona tallaalka?

Dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha caafimaad iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka ayaa tallaalka marka hore ku helaya gudaha Manitoba.

Qaar ka mid ah dadka kale ee tallaalka helaya marka hore waa dadka aad u xanuunsan kara. Tani waxaa ku jira dadka waaweyn iyo dadka Dhaladka ah.

Goorma ayaan qaadan karaa tallaalka?

Waxay qaadataa waqti in la sameeyo tallaal ku filan qof walba. Dad kala duwan ayaa tallaalka qaadan doona waqtiyo kala duwan. Dawladaha iyo khubarada ayaa si wadajir ah uga shaqeynaya sidii loo gaari lahaa go'aamadaas. Macluumaad dheeraad ah ayaa la wadaagi doonaa marka ay tahay waqtiga dadka ay helayaan tallaalka.

Miyay tahay inaan iska qabo maaskaro oo ka fogaado dadka kale haddii aan qaato tallaalka?

Haa. Xirashada maaskaro iyo kala fogaanshaha jireed ayaa gacan ka geysan doonaan inaad adiga iyo dadka kaleba badqabtaan.

Miyay tahay inaan lacag bixiyo si aan u helo tallaalka?

Tallaalku waxay ku helayaan dadka ku nool Manitoba.

Miyay tahay inaan qaato tallaalka?

Waad dooran kartaa haddii aad rabto tallaalka COVID-19. Khasab ma ahan inaad qaadato tallaalka.

Dad badan ayaa waxyaabo kala duwan ka sheegaya tallaalka. Macluumaadka qaar sax ma ahan. Waxaad la hadli kartaa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka si aad wax badan uga ogaato tallaalka. Waxay ku siin doonaan macluumaad fiican.